Somali

# NIDAAM ILAALINTA WAALIDKA IYO CARRURTA

Sida uu dhigayo Sharciga La Dabacay 105-17
Sharciga Waxbarshadda Dadka Wax u dhiman yihiin (IDEA)
La Saxay 1997

Dugsiyadda waxa maamula Guddiga Waxbarshadda ee Gobolka

**Ogeysiin iyo Ogolaansho Qoraal ah**

Waa khasab in ay ku siiso ogeysiis qoraal ah hay'adda mus'uulka ahi inta aan (1) qorshaha la bilaabin ama aan la beddelin aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta wax-barasho ee ilmaha ama shuruud waafaqsan wax-barashadda ilmaha; ama (2) diidmo in la bilaabo ama is beddel aqoonsi iyo qiimeynta ama shuruud waafaqsan wax-barashadda ilmaha. Ogeysiinkan waxa la socda warbixinta soo socota:

(1) Caddey talaabooyinka la hindisay ama la diidey, iyo sharaxaad ama faafaahin sababaha ay hay'addu u soo jeedisay ama u diiday in ay qaado talaabooyinkan, (2) caddeyn haddi ay aragti kale ka fikertey degmadu iyo sababahii haddi la diidey loo fulin waayey, (3) caddeyn qiimeynta wax-qabad kasta, imtixaan, diiwaan gelin, ama qoraal ay hay'addu u isticmaashay soo jeedin ama diidmo, (4) caddeyn waxii isir raac ah ee la xidhiidha soo jeedinta ama diidmadda, (5) bayaan waalidka ilmaha wax u dhiman yihiin oo leh nidaamka ilaalinta iyo haddi aanu ogeysiisku lahayn bilow u gudbinaya qiimeynta taas oo macnaheedu yahay nuqulka caddeynta helitaanka nidaamka ilaalinta, iyo (6) helitaanka meelo waalidku la xidhiidhaan oo ay ka heli karaan gar-gaar ama kaalmo fahamsiisa nidaamka ilaalinta waalidka.

Intaas waxa raaca, waa khasab in ogeysiiska lagu qoro hadal uu fahmi karo dadweynha caadi ahi, oo aad fahmi karto adigu -- iyo in lagugu sharxo afkaaga hooyo ama laggugu faah-faahiyo habka isgaadhsiinta ee aad ku dhaqantey, haddi aanu ahayn mid si cad u qeexan.
Haddi aanu afkaagu ahayn mid la qorey, waa in hay'addu diwaan gelisa talaabooyinkii la qaadey si loo hubiyo in ogeysiinta laggugu tarjumay afkaaga hooyo ama hab dhaqanka isgaasiineed ee aad leedahay, iyo in aad fahamtey oo gartey waxa ku qoran ogeysiiska. Waa in ay hay'addu qoraal ahaan ku diwaan gelisa in ogeysiiska sidaas loo fuliyey.

Waa in ugu yaraan lagu siiya nuqul(1) marka la tilmaamo in qiimeyn loo gudbiyo; (2) marka la aqoonsado barnaamijka qofeed ee wax-barasho shirarka(IEP); (3) ama qiimeynta labaad ee ilmahaaga; iyo (4) marka la codsado hawlaha dhegeysiga.

Waa in ay hay'addu hesha qoraal aad ku ogolaatey inta aaney bilaabin qiimeynta ama biloowga wax-barsho khaas ah iyo adeeg la xidhiidha ilmaha wax u dhimaan yihiin. Biloowga qiimeynta waxa dhici karta in aan loo bahan ogolaansho sida ogolaansha biloowga meelaynta. Muraajaco lagu sameeyo arrin hore u jirtey waa qiimeyn ama dib u qiimeyn u baahna helid ogolaansho, waxa kale oo aan ogolaansho loo baahneyn marka dugsiga degmaddu ama hay'addu isku daydo in ay kula soo xidhiidhto ugu yaraan laba jeer "muddo caqli gal ah" hase yeeshe

aanad ka soo jawaabin, isla markaasna ay diiwaan gelyeen sida: iyada oo si faah-faahsan u diiwaan geliyey waqtigii lagu wacay(telefoonka lagu soo direy) iyo sida ay ku dhamaatey marka lagu soo wacay; nuqul qoraalkii laguu soo direy iyo caddeymo in aad heshey, qoraalo caddeynaya in la tegey guri-gaaga ama meesha aad ka shaqeyso iyo siddi ay ku dhamaadeen. Si ay hay'addu u hesho ogolaansha-haaga waa in ay kuu bandhigta hay'addu mawqifkeeda dhegeysataana waxii aad danneyneso. Looma baahna ogolaansho maamulka imtixaanadda laga qaado carrurta oo dhan, haddi aanu ahayn mid laga codsadey carrurta oo dhan.

Haddi aad ogolaan waydo bilowga qiimeynta iyo dib eegidda qiimeynta, hay'addu waa ay wadi doonta qiimeynta iyada oo kaashaneysa dhegeysiga soo fool leh ama nidaamka dhex-dhexaadinta.

Waxa dhici karta in hay'addu aaney isticmaalin diidmadaada aad diidey in aad ogolaato adeegyadda mid ka mid ah, ama ay u diido adiga ama ilmahaaga adeegyo kale, oo wax-tar u leh.

"Ogolansho" macnahiisu waa: (1) in si buuxda lagu soo wargelyey war-bixinta arrinta inta ugu muhiimsan, oo la adeegsaday afkaaga hooyo, ama hab kale oo dhaqan ahaan aad u wada xidhiidhaan; (2) in aad fahamtey oo aad qoraal ku ogolaatey in la wado arrinta muhimaddeeda iyo in ogolaashaha ay ku qeexan tahay talaabooyinka la qadayo iyo in la diiwaan gelyo(haddi ay jiraan) oo la sii deyn doon iyo cidii loo diri doono; iyo (3) in aad fahamtey in bixinta ogolaansha-ha ay ikhtiyaar u leeyihiin oo aaney khasab ku ahayn dhinaca waalidiinta iyo in ay burin karan waqtigii ay doonaan. Haddi aad dib ula noqoto ogolaansha-haaga, la noqoshada ma ah mid lama soo nolayn karo.

"Qiimeyn" macnaheedu waa nidaam la raaco oo lagu hubiyo in ilmaha wax u dhiman yihiin, wax qabadka iyo inta ay le'ekaan doonto wax-barashadda gaarka ahi iyo adeegyada la xidhiidha ee ilmahu u baahan yahay iyo hor u marinta manhajka guud. Muddada waxa la isticmaali-doona nidaam loo xuley ilma kasta gaar kiisa oo aaney ku jirin imtixaanadda assaasiga ee maamulka ama nidaam loo isticmaalo dhamaan carrurta dugsiga oo dhan, darajo ama fasal.

**Qiimeyn Madax-bannaan**

Waxaad xaq u leedahay qiimeyn waxbarasho oo madax-bannan in aad ku hesho kharshka dad-weynaha haddi aad ku raaci weydo qiimeyntii ay sameysay demaddu. "Qiimeyn waxbarsho oo madax-bannan" macnaheedu waa qiimeyn uu qaado imtixaane khibrad u lehi, kaas oo aan ahayn shaqaale hay'adda mas'uulka ka ah ilmaha waxbarashadiisa su'aashu ka jirto. "Kharashka dadweynaha" macnahiisu waa in hay'ad dadweynahu bixiso dhamaan kharshka ku baxa qiimeynta oo dhan, ama ay xaqiijiso in qiimeynta aan wax kharash ah loo raaci doonin waalidka.
Hay'addu waa in ay ku siisaa, haddi aad waydiisato, war-bixinta meesha laga helayo qiimeyn waxbarasho oo madax-bannaan. Waxa dhici karta in hay'addu bilowdo dhegeysi si ay u muujiso in qiimeyntu ahayd sidii lagu talo galey (eeg "Munaasibka Nidaamka Hawl-socodka"). Haddi hay'addu bilowdo dhegeysi oo uu dhegeysigas go'aankisu noqdo in qiimeyntu tahay mid haboon, adigu weli waxaad xaq u leedahay

qiimeyn madax-bannaan, laakiin ma aha kharashka dadweynaha.

Waxaad heli karta qiimeyn madax-banaan adiga oon hay'adda ogeysiin in aad diidan tahay. Hay'addadu waa ay ku siin nuqul siyaasadeeda oo ku taxaluqa qiimeynta madax-bannaan (haddi ay jirto) marka aad codsato. Markasta oo qiimeyn madax-bannaan lagu sameeyo kharashka dadweynaha, waxa ay ku saleysan tahay in la helo qiimeynta, oo la socoto meeshi lagu qabtey qiimeynta iyo xirfadda imtixaanaha, waa khasab inuu ku saleysnaado kii ay hay'addu isticmaashay markii ay bilaabeysay qiimeynta waana in cabirka la gaadhsiiyo xaqa waalidku u leeyahay qiimeyn madax-bannaan. Cabirkan mooye, waxa laga yaaba in hay'adda dadweynaha ee mas'uulka ahi aaney amrin wax shardi ama waqti go'an ah. Haddi aad codsato qiimeyn madax-bannaan, waxa laga yaaba in hay'addu ku waydiiso waxa aad ku diidday hay'adda qiimeynteeda. Si kastaba ha ahaatee, waxa laga yaaba in hay'addu aaney dalban faah-fahin ama aaney sabab la'aan u dib dhigin qabashadda qiimeyn madax-bannaan oo kharash dadweyne ah ama bilowga nidaam shegeysi oo munaasib si loo difaaco qiimeynti hay'adda. Hay'addu waa ay ka jawaabi war-bixin kasta oo qiimeyn madax-bannaan iyo tix-gelin siin go'aanka lagu sameyey ixtiraan iyo aqoonsi, qiimeyn, ama meeleynta ilmahaaga, ama ku tala-galka waxbarasho lacag la'aan ah oo ku haboon ilmahaaga. Waxa loo bahan yahay in hay'addu tixgeliso war-bixinta qiimeynta madax-bannaan, laakiin uma xil-saarna in ay wax ka bedesho barnaamijka/meelaynta assaaska qaybaha tartanka ilmahaaga. Haddi bid loo habeeyo barnaamijkameelaynta/ qiimeynta ilamhaaga, waa go'aan gudigga (IEP). Waxa laga yaaba in natiijada qiimeyntan loo soo ban-dhigo marag ahaan dhegeysi kasta oo la xidhiidha ilmahaaga. Haddi uu codsado sarkaalka dhegeysigu qiimeyn waxbarasho oo madax-bannaan in ay qayb ka noqoto dhegeysiga, qiimeynta waxa bixin doona kharashka dadweynaha.

Haddi aad sameysay qiimeyn madax-bannaan oo ku meel gaar ah, natiijada qiimeynta waa in uu tix-geliyo dugsiga degmadu, haddi ay waafaqdo cabirka hay'adda, go'aan kasta oo lagu gaadho qadarin shuruudaha waxbarsho; dadweyne oo lacag la'aan ah una haboon ilmahaaga, iyo in loo bandhigo marag ahaan munaasabada nidaamka dhegeysiga.

**Meesha loo maro Qoraalka Diwaanka**

Waxaad xaq u leedahay in aad kormeer iyo dib –u-hubin ku sameyso dhamaan qoraalka la soo urruriyey ee ku saabsan ilmahaaga iyo in si qeexan laggugu sharxo adiga. Waxaad xaq u leedahay in aad hesho nuqul qoraalka ah, haddi ay dhacdo in aad weydo waxa ay kaa hor joogsaneysa xaqii aad u lahayd kormeerka iyo dib-u-hubinta. Waxa laga yaaba in hay'addu ku warsato in aad bixiso ajuro(lacag) nuqulka qoraalka, haddi aaney taas ka hor joogsan kormeerka iyo dib-u- hubinta.
Waxa laga yaaba in aaney hay'addu ku warsan ajuro badhitaanka iyo dib-u-sixida war-bixinta ku saabsan ilmahaaga. Waxa kale oo aad xaq u leedahay in wakiilkaagu kormeero dibna u-hubiyo qoraalka. Waxa intaas dheer in hay'addu kugu dhiiriso in aad awood u leedahay kormeerka iyo dib-u-hubinta qoraalka ilmahaaga haddi aan lagula talin hay'adda in aanad heysan awood ku

haboon Sharciga Gobolku maamulo sida arrimaha mas'uulid qaadka ilmo aanad dhalin, kala guurka qoyska iyo furitaanka (kala taga).
Hay'addu waa ay addeeci codsiga helitaanka qoraalka mana jirayo dib dhac sabab la'aan ahi iyo shir ka horeya oo la xidhiidha barnaamijka waxbarsho ee keli-kelida ah, ama dhegeysi la xidhiidha caddeyntan, qiimeynta, ama meelaynta ilmaha, iyo dacwo la'aan in ka badan 45 casho ka dib markii la codsaday.

**Qarsoodi ahaanta War-bixinta**

War-bixinta la soo ururiyey, la sii wado ama ay adeegsatey hay'addu ee ku saabsan ilmahaaga waa khasab in ay ahaado qarsoodi. Xaq ayaad u leedahay in aad codsato liis diwaanka noocyada iyo goobaha ilmahaaga wax-barashadiisa, iyo liis qolo kasta oo heshay war-bixinta diwaankaas.
Hay'addu waa in ay haysa diwaanka qolooyinka helay, ila kuwa ka helay waalidka mooyaane ama shaqaale degmada ka tirsan awoodna u leh helitaanka, iyada oo la qorayo magaca, tariikhda, iyo qasdiga loo qaatey.
Hay'adda dadweynha ee mas'uulka ahi waa khasab in ay adkeyso, sababta baadhitaan dadweyne, liis hadda ah oo magacyda iyo darajadda shaqaalaha awooda loo siiyey. Haddi ay diwaanka ku jiraan war-bixino ka siyaado ah ilmo kelya, waxaad xaq u leedahay inaad baadho dibna u hubiso war-bixinta ilmahaaga la xidhiidha oo keliya.

War-bixinta sii wadideeda iyo sii deynteeduba waxa loo tix-raacaya xeeka u dhigan Sharciga Xuquuqda Waxbarasha iyo Keli ahaansho ee Qoyska(Family Educational Rights and Privacy Act "FERPA") ee 1974 iyo in hay'adda mas'uulka ahi aaney sheegin, adiga oo aan u fasaxin, war-bixinta diwaanka ilmahaaga haddi aan awood laga helin xeerka u dhigan FERPA.
Waa khasab in la hela ogolaansha-haaga ka hor inta aan loo sheegin war-bixinta cid ka baxsan saraakiisha hay'addaha ka qayb qaadanaya ururinta ama isticmaalaya macluumaadkan ama u isticmaalaya ujeedo aan ahayn kulan ay dalbatey IDEA. Haddi aad diido inaad bixiso ogolaasha-haaga waxa laga yaaba in hay'adda dadweynaha ee mas'uulka ahi caawimaad weydisato munasibka nidaamka hawlsocodka dhegeysiga.
Haddi diidmada ogolaansha-haaga ay ka abuuranto daryeel la'aan sida ku dhigan sharciga Misuuri ee la yidhaahdo Missouri's Child Abuse and Neglect Laws, hay'adda dadweynha ee mas'uulka ah waxa ay si la mid ugu gudbin doonta madaxdda munaasib u ah.
Hay'addu **uma** baahna in ay kaa hesho ogolaansho qoraal ah ka hor inta aanay siinin diwaanka hay'add aad qorsheysay in aad u wareejiso ilmahaga, saraakiisha degmaddada gudaheeda haddi ay u baahdaan sabab la xidhiidha waxbarashada, ama saraakiisha Qaybta Waxbarashada Hoose iyo Sare ee Misuuri(Missouri Department of Elementary and Secondary Education).
Hay'ad kasta oo ka qayb qadaneysa waxa ay ilaalin doonta sirta war-bixinta la urursahy, kaydsan, la sheegey, iyo marxaladda bur-burinta. Hal sarkaal ayaa hay'ad walba mas'uuliyadda sir ilaalinta war-bixinta xaqiijin doona.
Dhamaan shakhsiyaadka ururin doona ama isticmaali doona war-bixinaha shakhsiga ah waa khasab in ay qaataan tababar ama tusaa'looyin la xidhiidha siyaasadda gobolka iyo nidaamka loo ilaaliyo sirta. Haddi aad rumeysan tahay in war-bixinta la soo ururiyey aaney sax ahayn ama marin-habaabineyso, ama ku xad-gudub xornimada ama xuquuda kale ee ilmahaaga, waxaad weydiisan karta in

ay hay'addu dib u saxdo war-bixinta. Hay'adda ayaa waqti macquul ah ku gaadheysa go'aan in ay dib u saxdo war-bixinta iyo in kale. Waa lagu soo ogeysiin go'aanka iyo in ay hay'addu kala taliso xuquuqdaada dhegeysi. Hay'addu, marka aad warsato waxa ay ku siin doonta taxaadi war-bixinta diwaanka waxbarsho. Dhegeysia noocan ahi waxa uu wafaqsan yahay nidaamka u dhigan Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoyska(Family Educational rights and Privacy Act "FERPA") ee 34 C.F.R. 99.22, mana hoos yimaado waxbarasha khaaska ah munaasibka nidaamka dhegeysiga. Haddi natiijada dhegeysiga,ay hay'addu go'aansato in war-bixintu aaney sugnayn, marin habow tahay, ama xad-gudub ku tahay xuquuq kale, dib ayay u saxi doonta war-bixinta sababtaas darteed waxana ay kugu soo gaadhsiin qoraal.

Haddi ay hay'addu go'aansato in aan dib loo saxin war-bixinta, waxa ay kuu soo ogeysiin si dhab ah arrinta, ayada oo dukometiga diwaanka lagu war-bixin doono ama sheegi doono sababta diidmada go'aanka hay'adda. Hay'adda waa khasab in ay faah-faahinta ku adkaysato, iyo haddi war-bixinta loo sheego qolo, waa khasab in la sharaxo.

Dhamaan xuquuqda kali-ahaaneed iyo diwaanka waxbarasho ee halkan lagu tilmaamey la jirka waalidka waxa loo gudbin doona ilmaha marka ay da'diisu gaadho 18, ila ay noqoto xaaladiisu/deedu mid aan awood u lahayn qaadasho go'aan noocan ah iyo in sharci ahaan uu leeyahay wakiil go'aanada gooya xata haddi uu gadho18. Marka ay arrintani timaado wakiilka sharciga ah ayaa sii wadi doona xuquuqda iyo arrimaha kale ee aan kor qorney. Waalidka iyo ilmaha waa la ogeysiin wareejinta xuquuqda.

Hay'adda dadweynaha ee mas'uulka ahi waa in ay ku darta bayaanka qoraalka waxii talaabo anshax ah ee laga qaadey ilmaha hadda iyo mar horeba, loo qorana sida uu ugu qoran yahay talaabadda anshaxa ee la qaadey, iyo in ay gudbiso, qoraalka ardayga aan ahayn carrurta wax u dhaman yihiin. Bayaanka waa in lagu caddeyaa falkii uu ilmahu sameyey iyo talaabadii anshax ee laga qaadey, iyo wixii kale ee war-bixin la xidhiidha nabad gelyada ilmaha iyo ciddi kale ee ilmaha lug ku leba. Haddi gobolku qabatimey siyaasadan, oo ilmaha laga beddelay dugsi ila dugsi kale, waa in beddelkaas la qora laguna dara ilmaha IEP diisa hadda ah iyo haddi ay jiraan talaabooyin anshax ee waqtigan la joogo ama mar horeba ee ilmaha lagaga soo hor jeeday.

**Baa-bi'inta Qoraalka**

Waa in ay hay'addu ku soo ogeysiisa marka war-bixin shakhsi ah oo la ururiyey, la wado, ama la isticmaalay, aanay jirin baahi dambe oo loo adeegsanayo dhinaca waxbarashadda. "War-bixinta shakhsiga" macnaheedu waa in ay la socdaan: magaca ilmaha, ilmaha waalidkii, ama xubno kale oo qoyska ka mid ah; cinwaanka ilmaha; aqoonsiga shakhsiga ah, sida ilmaha lambarkiisa aqoonsiga(social security number) ama lambarka ardeyga; ama liisto dabacadahiisa shakhsiga ah ama war-bixino kale oo suurto gelin kara in ilmaha lagu soo sooci karo(garan karo). Xaq ayaad u leedahay in aad weydiisato in la tir-tiro shan sano marka ay ka soo wareegto, war-bixinta qoraalka ah ee ilmahaga ee aan baahi dambe loo qabin dhinaca waxbarashada. Waxaadse ogaata in war-bixintaasi mararka

qaarkood aad u baahan doonto qaadashada lacagta Social Security ama adeegyo kaleba. Hay'addu waxa ay sii wadi doonta in ay si rasmi ah u diwaan geliso ardayga lambarkiisa, cinwaankiisa iyo telefoon lambarkiis, isaga/iyada darajadooda, qoraalka imaatinkooda degsiga, imaatinka fasalka, heerka darajo ee uu dhameeyey, iyo sanadka uu dhameeyey.

**Ka qayb-qaadashada Waalidka**

Waxa lagu siin doona fursad aad kaga qayb qaadato shararka si xusmad leh si loo tilmaamo qiimeynta, iyo meeleynta waxbarasho ee ilmahaaga iyo ku talo-galka waxbarasho ku haboon oo lacag la'aan ah.

**Anshax**

1. Toban casho oo dugsigu furan yahay ama ka yarba: Ilmahaga waxa ay hay'addu kaga wareejin karta meeleynta uu hadda dhigto muddo toban casho ah, ama in ka yar, iyaga oo u wareejinaya mid ku haboon oo ku meel gaadh ah, waxna ka beddeli kara gun-dhig waxbarasho, ama gun dhig kale, ama raacdeyn iyada oo aan wax adeega loo fidneyn, haddi aaney dhacdadu ku lug lahayn daroogo ama hub, taas oo u beddeli karta in ay noqoto 45 casho loona baahdo adeegyo ku meel gaadh ah ee aan hoos ku soo sheegi doono ama dhacdada oo aan lug ku lahayn ilmahaaga laxaad la'aantiisa, taas u beddeli karta in lagu daro raadcayn muddo dheer ah ama laga eryaba taas loo baahan doono in adeegyo ku meel gaadh ah sida hoos ku qoran.
2. 45 casho: Ilmahaga meeleyntiisa waxa la wareejin kara mid ku haboon oo ku meel gaadh ah wax beddeli kara gun-dhig waxbarasho, anshax marinta waxa uu mari doona muddo la mid ah ta uu maro ilmo aan wax u dhineyn, laakiin aan ka badeyn 45 casho haddi ilmahaagu haysto hub khatar ah dugsiga dhexdiisa ama la gartey in ilmahaagu isticmaalay haysto daroogu sharciga khilaafsan, ama iibiyey, ama ka qayb qaatey waqtiga dugsiga. Taariikhda go'aanka la qaato, waxa lagugu soo gaadhsiin bayaan Nidaamka Ilaalinta-nabadgelyadda.
3. Qiimeyn Dhaqanka : Dhamaadka ama ka hor maalinta tobnaad ee shaqo, talaabadda anshax ahna marka ugu horeys ee sanad dugsiyeedka oo isku ururay, haddi aney hay'addu qaadin qiimeyn anshax iyo ka baaraan degid anshaxa ilmaha inta aan lagu talaabsan natiijada anshax marinta, waa in hay'addu isugu yeedha shir IEP si loo abuuro qorshe qiimeyn ku abaaran anshaxan. Haddi ilmahaga hore logu qabtey shirkan, gudiga IEP ayaa dib u hubin doonta qorshaha waxna ka bedeli doonta sida loga baahan yahay, si ay ugu abaarto dhex-galka talaabadan anshax marinta. Haddi aanu ilmahaagu hore logu qaban shir noocan ah, gudiga IEP ayaa u abuuri doonta kana baaraan degi, oo soo saari arrin cusub. Qaaditaan isku xiga, hase yeeshe aan u baahaneyn anshax marin bedesha meeleynta, u baahan in gudiga IEP dib u hubiso dabeecada soo saarid wax cusub qorshe iyo ka baaraan degid go'aanada haddi loo baahdo bid u habayn. Haddi qof ama in ka badan oo ka mid ah gudiga IEP ay rumeysato in dib u habayn loo baahan yahay, gudigu wuu fadhiisan si uu qorshaho dib u habayn logu baaraa dego, si ay gudigu u xadeyaan go'aanka loo baahan yahay.
4. Sida loo helo Adeegyadda: Waxii isbedel waxbarasho ee ku meel

gaadh ah gun-dhigna u ah go'aanka la xidhiidha raadcayn muddo dheer ah ama anshax marin bedesha meelayntiisa waxa sameynaya gu'diga IEP, waana in la xula in ay karsiiyaan ilmaha sii waditaanka ka qayb qaadashada manhajka guud iyo sii wadida adeegyada ay u baahan tahay gu'diga IEP, iyo in lagu daro adeegyada iyo dib u habaynta qorshe ku abaaran dhaqanka loo mariyey anshax marinta si aanu mar dambe u dhicin. Adeegyada raadcaynta muddada gaaban ee dhaafey 10 casho isku ururay ayaa u baahan oo keliya haddi ay hay'addu ga'aansato baahida horumar ilmaha ku haboon.

5. Go'aan Bayaamin: Isla markiiba, haddi ay suurta gal tahay, ama isla wakhtiga gu'diga IEP ay fadhistaan oo ku abaaran wax qabad qiimeyn iyo qorsho soo saarid wax cusub, laakiin aan ka badneyn 10 casho oo dugsigu furan yahay ka dib taariikhdii laga baan degay isbedelka anshaxa meelaynta( muddo –dheer ka qaadis taas oo la mid ka qaadis aan ka badneyn 10 casho oo isku xiga, ama dhowr qaaditaan oo gaadhaya 10 casho oo isku ururay kaas oo taxane noqday marka la eego cabirka qaadis kasta, isku darka caddadka waqtiga ilmaha la qaadey, iyo sida ay isgu dhow yihiin (qaaditaan-nadu), gu'diga IEP iyo shaqaale kale oo xirfad u leh ayaa go'aamin doona in xidhiidh ka dhexeeyo laxaad la'aanta ilmaha iyo mawduuca dhaqanka keenay anshax marinta. Haddi go'aanku noqdo in aan xidhiidh ka dhaxeyn ilmahaaga laxaad la'aantiisa iyo dhaqan xumada, waxa uu mari doona anshax marinta ay maraan carrurta laxaadka qabta. Si-kasta ha ahaate, marka ay sidaas tahay waa in ilmahaagu weli qaataa waxbarasho ku haboon oo lacag la'aan ah. Haddi dugsiga degmadu tilmaamo nidaam anshax marin oo ku haboon ilmaha oo dhan, waxbarashada khaaska iyo qoraalka anshax marinta waxa baahin doona ahmiyada qof ama in ka badan gaadhi doona go'aan kama dambeysta ah ee la xiriira talaabada anshax marinta. Haddi aanad ku raacsaneyn go'aankaas in ilmahaaga dhaqankiisu bayaamin laxaad la'aantiisa, ama go'aan ka mid ah oo la xidhiidha anshax marinta iyo meelaynta (raadcaynta muddada dheer), waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato si deg deg ah dhegeysi nidaamsan. Gu'd iga IEP ayaa go'aamin karta in aan dhaqanka ilmhu bayaamin laxaad la'aantiisa waa haddi gu'diga IEP qadariso dhamaan war-bixinta la xiriirta, marka lagu daro qiimeynta iyo natiijooyinka ogaanshaha nooca cudurka(lana raacinayo natiijoyin ama waxyaalo kale oo khuseya oo aad adigu ku darto), faalo ka bixin ilmaha, IEP da ilmaha iyo meelaynta, iyo ka dib go'aano:

- IEP da iyo meelayntuba waa ay ku haboon yihiin iyo adeega waxbarashada khaaska ahiba, waxa raacsan kaalmo iyo adeegyo, soo saarid xeelad cusub ayaa ay fidiyeen IEP ilmaha iyo meelayntuba.
- Ilmaha laxaad la'aantiisu ma ay difaacin awooda wax garadka ee dhalisay natiijada mawduuca, talaabadda anshax marin.
- Ilmaha laxaad la'aantiisu ma ay doorin awooda ilmahu ku qabto mawcuuda dhaqan ee talabadda anshax marin.

Maqnaasho qaddarin la'aan ama qaadasho go'aan, waa in gu'diga IEP qaddarisa dhaqanka bayaanka ee laxaad

la'aantiisa. Haddi gudigu tilmaamo wax ka doorin IEPka ilmaha ama meelayntisa ama in laga baaraan dego, waa in talaabooyin deg deg ah la qaada si loo saxo meelaha beddelka u baahan.
Dib u hubinta bayaanka go'aan qaadashadda, salkaalka dhegeysanaya ayaa go'aaminaya in hay'adda dadweynahu soo qeexday in dhaqankiisu aanu bayaan ahayn ilmaha laxaad la'aantiisuna joogto tahay laguna daro liiska qaddarinta iyo liiska go'aanada la qaaday.
Ilmaha Khatarta ah: Haddi ay hay'addu u aragto in ilmahaagu naftiisa dhawac gaadhsiinayo ama dadka kaleba, waxa ay hay'addu xaq u leedahay in ay raadiso si deg deg ah codsi dhegeysi nidam munaasib ah, 45 casho ku meel gaadh ah inta wax laga beddelayo qorshaha waxbarsho. Waa in lagu wargeliya go'aankan wax lagu raadinayo isla maalinta go'aanka la gadho, waana in lagu fidiya bayaan hawl qabad oo nabadgelyadda ah. Wakhtiga dhegaysiga, guddiga dhegaysigu waa ay amri karta in loo beddelo meelaynta meel ku haboon oo ku meel gaadh ah waxna laga beddelo qaabka waxbarshada in aan ka badneyn 45 casho haddi sarkaalka dhegaysigu:

- go'aanka hay'addu leeyahay wax cad oo la taaban karo oo marag ah ( sida wax ka qaalib ah maraga) laguna adkeysto meelaynta hadda ee ilmahu joogo lana taabtey in ay dhici karto in uu is dhawaco ama cid kale dhawaco;
- qaddariyo in meelaynta uu hadda jooga ku haboon tahay ilmahaaga;
- qaddariyo in ay hay'addu si macquul ah xooga uu saartey in ay yareeyaan halista (dhib) gaadha ilmaha meleynta uu hadda joogo marka lagu daro kaalmo siyaado ah iyo adeegyo; iyo
- go'aan kasta oo la gaadho oo ku meel gaar ah wax ka beddelka qorshaha waxbarasho awoodna siineysa ilmahaaga in uu sii wato horumarinta manhajka guud iyo qaadashadda adeegyada ay codsatey IEP diisu.

Nidaamkan waa la soo celcelin kara marka loo baahdo.

1. ("Stay Up") talaabooyinka anshax: Haddi aad cosato nidaam dhegeysi oo munaasib ah oo la xidhiidha talaabadii anshax si aad ula tartanto wax ka beddlekii qorshaha waxbarasho ee ku meel gaadhka ahaa iyo marka ilmahaaga lagu anshax mariyo hub uu haystey, daroogo, ama isaga oo halis u ah naftiisa iyo dadka kaleba, ilmahaagu waxa uu joogi doon qorshahaas waxbarasho ee ku meel gaadh ah inta laga gaadhayo go'aanka dhegaysiga ama inta ay ka dhacayso wakhtigaas ku meel gaadhka ah ee loo qabtey, kolba kii soo horeya(haddi aanay labada dhican wax kale isku raacin). Haddi shaqaalaha hay'addu ay sii wadaan in ay khatar u tahay ardeyga in uu sii joogo meesha hadda lagu meleyey (meleynta ka horeysa wareejinta qorshaha waxbarsho ee ku meel-gaadhka ah) inta la sugayo nidaam hawl socod oo munaasib ah, dugsiga degmaddu waxa uu codsan kara dhegeysi deg deg ah.
2. Dhawritaanka carrurta aan u qalmin waxbarashada khaaska ah iyo adeegyadda la xidhiidha: Ardeydda aan lagu tilmaamin in ay laxaad la'yihiin ayaa dhici kart in la mariyo xajmiga ciqaabta ee ay maraan carrurta laxaadka qabta haddi aan degmaddu hore u aqoonsan laxaad la'aantiisa. Haddi ay hay'addu aqoonsato in ilmahu uu ahaa ilmo

wax u dhiman yihiin ka hor intii aan la soo ban dhigin talaabadda anshax marin, waxa laga yaaba in uu ilmahu helo xuquuqda ilaalinta ardeyda laxaadka la'a dhinaca anshax marinta. Degmaddu waa ay aqoonsaneysa laxaad la'aanta marka:

- waalidku qoraal ku soo gudbiyo walaac (ama afkaba ka sheego haddi aan waalidku wax qori karin ama uu qabo laxaan la'aan ka hor joogsata bayaan qoraal ah) in uu ilmahu u baahan yahay adeegyadda waxbarashadda khaaska ah; ama
- ardeyga dhaqankiisa ama hawl fulintiisa ay bandhigaan baahida adeegyadaas; ama
- waalidku codsadey in qiimeyn lagu sameeyo; ama
- macallinka ardeyga ama shaqaale hay'ad kale oo muujiya walaac ay ka qabaan ardeyga dhaqankiisa iyo hawl fulintiisa oo ay u gudbiyaan agaasimaha waxbarshada khaaska ah ama shaqaale kale oo hay'adda ka mid ah.

Hay'addu ka fekeri meyso in ilmahu yahay mid wax u dhiman yihiin, haddi dugsiga degmaddu sameeyey qiimeyn iyo go'aan ah in aanu ilmahu ahayn mid wax u dhiman yihiin, ama go'aamiyo in aan loo baahneyn qiimeynta iyo keenid Ogeysiis Talaaba Diidmo oo hagaagsan.

Haddi codsi qiimeyn dhaco muddadii ardeygu anshax marinta ku aadaneyd, qiimeynta waa la dedejin. Ila inta laga dhameynayo qiimeynta, ilmahu waxa uu joogi doona waxbarshadii ku meel gaadhka ahayd ee hay'addu go'aamisay, laga yaabana in ay ku jiraan raadcay iyo eri lagana joojiyo adeegyada waxbarsho. Haddi ilmaha la go'aamiyo in uu yahay ilmo wax u dhiman yihiin, hay'adda ayaa ugu deeqi doonta waxbarsho khaas ah iyo adeegyada la xidhiidha oo ay daba socdaan hawl socodka anshax marinta ee laga rabo ilmaha wax u dhiman yihiin.

9) Qoritaanka dembiyadda ay galaan ardeyda wax u dhiman yihiin: Hay'adaha mas'uulka ah ayaa gudbinaya dembiga, kuna hagaajinaya ciidanka ku haboon, mas'uuliyiinta garsoorka, dembiga uu galey ardeyga wax u dhiman yihiini, nuqulo laga sameyey waxbarashada khaaska ah iyo diiwaank anshaxa ee ilmaha ayaa loo gudbin doona si ahmiyad leh ma'suuliyiinta ku hawlan ee qoraalka dambiga loo gudbiyey.

10. Qeexitaan:

- Waxyaalaha xukun-kooda la adkeeyey macnaheedu waa daroogada iyo waxyaalaha kale ee ku qeexan jadwalka I, II, III, IV, ama V qaybta 202(c) ee Xukunk-kooda la Adkeeyey Qodobkisa (21 USC 812(c)).
- Daroogada aan sharcig ahayn macnaheedu waa kuwa sharcigu adkeeyey hase yeeshe laguma darin kuwa la fasaxay qadasha-dooda ama la isticmaalo iyaga oo ay maamulayaan dad u haysta fasaxa (ruqsad) sida dhakhaatiita liisanka leh ee cafimaadka ama la baneyey lahaansha-hooda ama la isticmaalo iyada oo maamulka loo hayo sida Qodobada hoos yimaada shuruudaha Sharciga Dawladda Dhexe.
- Daliil Muuqda macnahiisu waa wax ka qaalib noqda markhaatiga .
- Hub macnahiisu waa hub khatar ah sida ku cad sadaradda (s) ee qaybta hore (g) iyo qabta 930 ee cinwaanka18, Shuruucda Dawladda Mareykan(United States Code).

**Meelaynta Waalidka ee Dugsiyada Khaaska ah.**

1. Adeegyada

Si shuruud joogto ah looga dhigo lambarka iyo degmo kasta meesheeda, waa in la sameeyo ku tala gal dugsiyada khaaska ah carrurta wax u dhiman yihiin. Hase-yeeshe, malaha ilmaha dugsiga khaaska dhigta(private school) xaq keli-ahaan ah oo uu ku heli karo qayb ama dhamaan waxbarshada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ee uu heli lahaa haddi uu dhigto dugsiga dadweynaha. Haddi ilmahaaga hay'ad dadweyne oo ma'suul ka ahi u magacawday in uu helo waaxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xidhiidha, waa in hay'adda dadweyne ee mu'suulka ahi u abuurto qorshe uu ilmahaagu ku helo adeegaas.

Go'aanka dugsiga khaaska ee carrurtu ka helayso adeegyada, waa in ay hay'adda dadweyne ee mas'uulka ahi fulisa tiro sanadeed dugsiyada khaaska ah ee carrurta wax u dhiman yihiin. Hay'adda dadweyne ee mus'uulka ahi waa in ay bixisa hawl qabadka waxbarshada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha ee carrurta dugsiyada khaaska ah in u dhiganta inta deeqda IDEA ee dugsiga degmadu hesho, sida tirada carrurta dugsiga khaaska ah ee wax u dhiman yihiin noloshiisa iyo awooda xukun tirada guud ee carrurta wax u dhiman yihiin iyo xukun –kooda.

2. Xadeynta Mag-dhawga

Haddi aad ilmahaaga qorto dugis khaas ah adiga oo aan ka helin ogolaansho ama aaney gudbin dugsiga degmaddu, maxakamad, ama kooxda nidaam dhegeysiga ayaa codsan karta in dugsiga degmaddu kuu celiyo kharshkii kaga baxay qoritaanka dugsiga khaaska, haddi aanay dugsiga degmaddu kuu fidinin waxbarsho dadweyne oo ku haboon ilmahaga waqti munaasib ah iyo haddi ay meelaynta khaaska ahi u haboon tahay. Meelaynta waalidka ayaa dhici karta in ay noqoto mid uu ogolaado sarkaalka dhegaysigu ama maxakamad xataa haddi aanu buuxin shuruuda gobolku rabo taas oo ay ansaxisay hay'ad khaas ahi. Si kastaba ha ahaate, caddadka mag-dhawga ayaa yaraan kara ama la diidi kara:

- haddi shirkii ugu dambeyey ee gudiga IEP ee aad ka qayb gashay wareejinta ka hor aanad u sheegin in aad diidan tahay meelaynta ay sameyeen dugsiga degmaddu, cadeysayna walaaca aad qabta, ujeedaduna ahayd in aad ku qorto ilmahaaga dugsiga khaaska ah kharashka dadweynaha; ama
- haddi ay gaadho toban casho oo la shaqeynayo (taas oo ay ku jiraan feest soo gashay maalin la shaqeyn lahaa) ka hor intii aan la wareejin ilmahaaga, oo aanad dhiibin ogeysiis qoraal ah oo aad ku diideysey meelayta ay soo jeediyey dugsiga degmaddu, cadeysayna walaaca aad qabto, ujeedaduna ahayd inaad ku qorto ilmahaaga dugsi khaas ah kharashka dadweynaha.
- Haddi, wareejinta ka hor dugsiga degmaddu kuu fidiyey ogeysiis ulajeedadiisu tahay qiimeyn, laakiin aanad adigu ilmahaga u diyaar gareyn qiimeyn-taas; **Ama**
- haddi uu jiro go'aan maxakamadi gaadhay oo ah in talaabadaadu tahay mid aan sabab lahayn.

Waxa laga yaaba in aan la diidin ama aan la yareyn kharash mag-dhawga iyada oo sabab laga dhigay in aad jawaab celin wayday ka hor ogeysiiskawareejinta haddi:

- aad tahay qof aan qorin akhriyina af Ingiriisga

- u hogaansamey codsiyo hore loo dalbaday kuwas oo ku dhamaadey wax yeelo muuqda iyo niyad jab ilmaha gaadhay
- hay'adda oo aan ku soo gaadhsiin ogeysiiska
- Dhawritaanka Bayaanka oo aan ku soo gaadhsiin qoraalka codsiga ogeysiiska ka hor.

**Nidaam Xal u helid oo Sababa Kulan (ikhtiyaari ah)**

Haddi la isku raaco tilmaanta, qiimeynta, meleynta waxbarsho ama waxbarsho ku haboon oo lacag la'aan ah ilmahaaga oo lagu gaadhi dooda, waxa qoraal ahaan kula talin doonta hay'adda oo si cad u qeexaysa talaabooyin-keeda ay soo jeedisay ama diiday in ay muujiso ama bedesho. Ka dib marka aad hesho ogeysiintan, waxaad codsan karta si qoraal ah war-bixin qaraar kulan maamulayaasha hay'adda AMA waad ka qaadi kara xuquuqda qaraarka kulanka adiga oo ka codsanay, qoraal ahaan in ay ku xoojiyaan Missouri Department of Elementary and Secondary Education 3 xubnood gudiga dhegeysiga. Shirka xal u helista marka la qabto, go'aanka waxa ku siin doona hay'addaada 10 casho gudahood helitaanka codsigaaga haddi aanad ogolaan waqti ka dambeya. Shirka waa in lagu qabta meel iyo waqti adiga kuu munaasib ah. Waxa qaban doona qofka madaxda ah (superintendent) ama qof uu magacaabo. Shirka xal u heliddu waa mid caadi ah (informal). Haddi aad ka qaado xuquuqda shirka xal u helidda oo aad codsato in 3 qof ay ku soo xoojiso gudiga dhegeysiga oo aad qoraal kula xidhiidho Missouri Department oof Elemenary and Secondary Education's Speacial Education Division gobalku waa uu socod siin xoojinta gudiga dhegeysiga. Marka la xoojiyo gudiga, hay'addu laba codsi ayaa u banaan: (1) qabasho kulan xal u helid, ama (2) in ay ka tanaasusho kulan xal u helidda. Haddi ay hay'addu doorato in ay qabato kulanka, inkasta oo aad ka tanaasushay xuquuqdii kulanka, waxa lagala talin doona wax-yaaba aad ka helaysid Kulanka dhexdiisa:

(1) in ay kuu sheegan kuna siiyaan ogolaansho in aad dib u eegto dhamaan war-bixinta ku saabsan ilmahaaga.
(2) hay'adda ayaa si buuxda kugu fasiri doonta sababta talaabo kasta ay u soo jeedisay ama u diiday,
(2) adiga iyo wakiilkaaga ayaa soo bandhigi kara waxii war-bixin ah ee la xiriira talo soo jeedin.
(3) Waa ogolaan doona waydiinaha maraga.

**Eex La'aan Nidaam Dhegeysi oo Haboon—Caam ah**

Adiga ama hay'adda ayaa bilaabi doona socodsiin nimaad dhegeysi marka aad isku diidaan talaabo la soo jeediyey ama diidmo saameysa qiimeyn, dib eegid qiimeyn, meelayn waxbarsho ama meelayn waxbarsho dadweyne oo lacag la'aan oo ku haboon ilmahaaga. Guddiga Missouri Department of Elementary and Secondary Education ayaa ku sheegi doona shirci yaqaan lacag la'aan ah ama wax yar ka qaata iyo adeegyo kale oo la mid ah oo aad ka heli karto degaan-kaaga haddi aad warsato ama haddi adiga ama hay'addu bilabaan dhegeysi. Ila ay dhacdo in uu si deg deg ah u joojiyo dhegeysi ka yimid talaabo anshax, gudiga dhegeysigu waa in ay go'aan gadhaan boostana ugu soo diraan nuqulka go'aanka labada dhinacba muddo dhan 45 casho maalinti la helay codsiga nidaamka dhegeysiga, haddi

aanu hogaamiyaha gudigu codsi kaga ansaxinin wakhti siyaadin labada dhicanba. Marxaladda dedejinta dhegeysiga hawl socodku waa in uu ku dhamaada muddo 45 casho ah. Lama ogola wakhti siyaadin dhegeysiga deg degta ah.

Gudiga Missouri Department of Elementary and Secondary Education ayaa ku siin doonta liisto dadkii u adeegay sarkaal dhegeysi ahaan, iyada oo la raacinayo heerka aqoontooda qof walba marka aad warsato.

Muddada arrintu socoto dhinaca maamulka ama maxakamaddaba sabab cabsho awgeed, ilmaha cabashado ku saabsan tahay waxa uu joogi doona meeshiisa/sheeda waxbarsho ee lagu meelayey, haddi aaney waalidka iyo hay'addu wax kale isku raacin. Haddi cabashadu ay ku saabsan tahay arji hore loga bilaabey qoritaan dugsiga dadweynaha, ilmaha oo uu waalidku ogolaansho bixiyo waa in lagu meelaya barnaamijka dugsiga daweynaha inta cabashado ka dhamaneyso. Haddi marka dhegeysigu dhamaado uu go'aanku noqdo mid waalidku u riyaaqo, ama wax ka beddel haboon yahay, waa in meelaynta loo dhameeya si hay'adda iyo waalidku wada jir u wada jeediyaan oo isku raacaan habka "stay up".

**Eex La'aan Nidaam Dhegeysi - Xareyn codsi, xuquuq daawo, xuquuq dhegeysi**

Haddi aad doorato in ay sii socdo kulanka xal u heliddu hase yeeshe aan xal fiican lagu gaadhin kulankii ay qabatey hay'addu, adiga ama qareen-kaaga ayaa qoraal ahaan rafcaan ka dalbi kara gudiga Missouri Department of Elementary and Secondary Education in la qabto nidaam haboon oo dhegeysi. Codsiga qoraalka ee rafcaanka waxaad ku diri karta boosta ama waad fax-gareyn karta adiga oo adeegsanaya cinwaankan gudiga ee hoos ku qoran:

MO DESE
P.O.BOX 480
Attention: Legal Section/Special Education
Jefferson City, MO 65102
(573) 526-4404

Haddi codsiga dhegeysigu yahay in la dedejiyo nidaam dhegeysi oo lug ku leh talaabo anshax waa i uu codsiga lagu cadeeya. Codsiga qoraalka ah oo ahaan doona qarsoodi, waa in la raaciya ogeysiin ah: ilmaha magaciisa, ilmaha cinwaankiisa, magaca hay'adda ilmaha ka wakiilka ah ee ilmahu ka dhigto; sheeg waxii dhibaato ah ee jira, oo raaci waxi aad u aragto xal haddi ay jiraan, gudiga dugsiyada ayaa haya foom aad ku qori karto war-bixintan oo dhan. Si aad u codsato foomkaas wac Speaicl Education Division, Legal Services Section, ee (573) 751-0602, ama RELAY MISSOURI 1800-735-2966 (dadka dhegaha la'a ). Xaqqa aad u leedahay in dhegeysiga waxa laga yaaba in aan loo diidin ama aan loo daahin jawaab la'aanta aad diri wayday codsigii loo bahnaa. Haddi aad ka tanasushay kulanka xal u helidda oo aad dooneyso in aad toos u abaarto nidaam dhegeysi, gudiga Missouri Department of Elementary and Secondary Education waa ay tixgelin doonta codsigaaga, waana ay bixin doonta kharashka dhex-dhexadinta, raac hawl socodka hoos lagu fasiray.

(1) Dhex-dhexaadinta waa la idiin fidin labadiinaba adiga iyo hay'addaba, markaa haddi aad labadiinuba isku raacdaan dhex-dhexaadinta waxa lagu siin doona liis loo tababarey garsoorka dhex-

dhexaadinta, waana in aad si wadaag ah mid isuugu raacdaan. Dhex-dhexaadinta loma isticmaalayo in lagu diido ama lagu dib dhigo xuquuqda nidaam dhegeysi oo haboon ama xuquuq kale oo uu dhigayo Sharciga Kelihaanta ee Waxbarashada dadka Wax u dhiman yihiin. Dhex-dhexaadiyahu waa qof garsoore ah oo aan shaqaale u ahayn hay'adda, ama hay'ad kale ama meel kale oo ku lug leh daryeelka ilmaha, waanu in aanu jirin u qof u xilasho ama dan shaqo.

Qofka u qalma in uu noqdo dhex-dhexaadiye ma aha in uu shaqaale ka yahay oo kelya LEA ama SEA sababta oo ah waxa kharashka siisa hay'adda uu ugu adeegayo dhex-dhexaad-nimada. Dhex-dhexaad-iyahu waa in uu aqoon iyo sharci u lee yahay hawlaha waxbarshada khaaska ah iyo adeegyada la xidhiidha, waana in uu qaatey tababar wax ku ool ah tabaha iyo xeeladaha dhex-dhexaad-nimada.

(b) qaybaha dhex-dhexaadinta waxa la qaban doona 15 daqiiqo oo ah heshiis aad kaga baaran degto, waxa lagu qabta meel labada dhinacba raali ka yihiin, dhex-dhexaadin-tuna waxa ay ku dhamaata muddo 30 casho ah oo lagu heshiiyey.

(t) waxa labada dhinacba ay xaq u leeyihiin in ay joojiyaan dhex-dhexaadinta wakhtigii ay doonaan.

(j) labada dhinac adiga iyo hay'adduba waa heli doontaan nuqul qoraal ah marka go'aanka dhex-dhexaadinta la gaadho.

(x) labada dhinacba waxa soo raaci kara ila sadex qof. Dadka inta ka badan ee siyaado ah waa in wada jiro la isgu raaca.

(d) adiga iyo hay'adda midkiina ma keeni karo qareen u dooda qaybaha dhex-dhexaadinta.

(r) dooda wakhtiga dhex-dhexaadintu waa qarsoodi, loomana isticmaali karo nidaam dhegeysi iyo arrimo kale toona, waxaana laga sexeexi in ay qarsoodi noqoto inta aan la bilaabin dhex-dhexaadinta.

(2) Foomka 3 xubnood waa in 15 casho gudahood laga bilaabo maalinti aad codsatey ( ama haddi dhaco dhegeysi deg deg ahi). Xubin adiga ayaa soo dooran doona, xubina hay'adda ayaa dooran doonta, xubinta kalena waxa dooran doona gudiga Missouri Department of Elemenary and Secondary Education, liiska qaareenada qandaraaska ku jira kaas oo noqon doona hogaamiyah.

Haddi aad guul leh ugu dooran waydo xubintaada muddo 10 casho ah, gudiga Missouri ayaa magacaabi doonta gudiga.

Qof ka tirsan gudiga (ama kuwa ku jira nidaamka dhegeysiga) midkoodna :

(b) ma yeelan karo dan shakhsi and mid shaqo oo ka hor istaagta go'aan uu fulin lahaa; ama

(t) ma noqon karo shaqaale ka tirsan hay'adaha ku lugta leh waxbarashada iyo daryeelka ilmaha. Qofna uma shaqeeyo hay'adda, sababta oo ah kharashka ayuun bay bixineysa.

(3) Gudigu wax uu haysta 45 casho laga bilaabo maalinta uu helay codsiga qoralka ah in uu qabto taariikh iyo meesh dhegeysiga, ogeysiiyana dhamaan dadka lugta ku leh, qabashada dhegeysiga, u gudbiyana qoraalka go'aanka gudiga waxbarshada.

Gudiga 3 xubnood ah, adiga iyo hay'adduba xaq baad u leedihiin:

(1) in aad wakiilataan la taliye sharci yaqaan ah, ama qof aqoon u leh ama

tababar qaatey dhibaatooyinka carrurta wax u dhiman yihiin.

(2) soo bandhigid markhaatiyo, xaqiiqooyin ama caddeyno kale;

(3) waa mum-nuuc faah-faahinta, xaqiiqoyinka, qiimeynta, iyo soo jeedin qiimeyn aan la qaban karin 5 casho la shaqeynayo gudahood dhegeysiga ka hor.

(4) waa in la hela qoral, ama ikhtiyaarka waalidka ku celcelin la rikoodh gareyo oo lacag la'aan ah:

(5) waa in la hela qoral ama ikhtiyaar waalidka iyada oo elektaroonik ah xaqiiqada iyo go'aanka dhegeysiga sida uu dhigayo Bayaanka PL 94-142 ee Gudiga La Talinta(Advisory Panel) oo ay heli karaan dadweynahu:

Waxa siyaado, ah oo aad dhegeysiga xaq u leedahay:

(1) in aad ilmaha keento arrintiisa la dhegeysanyo; iyo

(2) in aa dhegeysiga u furto dadweynaha.

Gudiga waxbarshada Missouri ayaa u magacabi doonta qareen la taliya gudiga 3 xubnood ka hor, marka lagu jiro, iyo marka la dhameyo dhegeysigaba. Qareenku waa in uu jooga dhegeysiga.

**Maskaxda ku haye:** Sarkaalka dhegeysiga ayaa ansaxin kara wakhti go'an siyaado ah oo labada dhinac midkood codsadey, haddi aanu kiisku mareyn dhegeysi deg deg ah. Dhegeysi kasta waa in la qabta wakhti mucquul ah oo ay raali ku yihiin waalidka iyo ilmaha arrintu khusaysaba. Sarkaalka dhegeysiga ayaa cabiri kara labada dhinac codsiyadooda sida qiimeynta, dib u eegda qiimwynta, so jeedin qiimeyn 5 casho gudahood ah laga bilaabo soo jeedintii warbixinta dhegeysiga iyada oo aan la warsan ogolaansho labada dhican midna.

**Talaabo Shacbi ah**

Haddi adiga ama Hay'addu diido go'aanka dhegeysiga, marka lagu daro go'aankii dhegeysiga degdega ahaa ee dokomentiga qaybta anshaxa, adigu rafcaan qaadan kara, adiga oo radinaya go'aankii ku jiray bayaankii maxakamada dhex. Go'aanada dhegeysigu waa kama dambeys ila labada dhinac midkood rafcaan qaato. Haddi rafcaan la xerreyo, maxakamaddu waa in ay hesha qoraal nidaam maamula ah, maqashana caddeyn dheeraad ah marka uu codsado qofku, taas oo ku saleysan ka qaalib noqosho caddeynta si maxakamaddu ugu fekerto wax haboon.

Maxakamadda degmadda ee Dawladda Mareykan waxa ay leedahay awood xukun arrintan oo kale taas oo aan wax khilaaf ahi ku jirin.

Ka hor inta aan la xareyn talaabo shacbi ah oo ku salaysan Dastuurka Mareykan, iyo Sharciga Dadka wax u dhiman yihiin ee Mareykan ee 1990, cinwaankiisa V ee Sharciga Dib u hagaajinta ee 1973, ama kuwa kale ee dawladda dhexe ee ilaaliya xuquuqda carrurta wax u dhiman yihiin, nidaam dhegeysi oo munaasib ah ayaa la helaya, waxa kale oo aad ka heleysa Individual with Disabilities Education Act (IDEA)

**Cabashadda Ilmaha**

Haddi adiga ama wakaaladu rumeysatan in hay'addi jebisay bayaankii ama reerkii dawladda dhexe ka baaraan degtey IDEA, adiga ama wakaaladda ayaa xareynaya sexeex, ku qoran tahay ashkato ilmaha iyo Missouri Department of Elementary and Secondary Education Cabashada waa in aad ku caddeysa codsiyada IDEA ee ay hay'addu ku xad

gudubtey, oo xaqiiqada ku salaysan. Cabashadu waa in aanay ka badan muddo hal sano ah oo xad gudubku dhacay, haddi aanay jiri sabab macquul ah oo uu sii socday xad gudubku, ama codsi mag-dhaw adeeg lagu xad gudbay oo aan muddadu ka badneyn sadex sano markii cabashada la helay. Ashkatadu waxa badhitaan-keeda la bilaabi doona lagana gun-gaadhi doona muddo dhan 60 casho, waxaanad heli doonta qoraal lagugu ogeysiinayo cabasho kasta xaqiiqada badhitaanka, go'aankii laga gaadhey iyo sababta Waaxdu go'aankaas u gaadhey. 60 ka casho dhexdooda Waaxdu wax ay sameyn doontaa badhitaan madax-banaan, haddi ay Waaxdu u aragto in looga baahan yahay qofka soo cawday in uu soo gudbiyo war-bixino iyo af iyo qoraal siyaado ah xidhiidha arrinta, waxa la siin doona fursan, waana la eegi doona in hay'addu ay ku xad gudubtey IDEA.

Waaxdu waa ay siyaadin doonta wakhtiga haddi ay u aragto in la tix geliyo cabasho gaar ah.

Si loo dhameyo dacwadda, hay'addu waa in ay adeecda, Waaxda ayaa go'aamin doonta sida loo jebiyey, iyada raacineysa waxa la siinayo ee loo mag-dhabayo ee ku haboon baahida ilmaha, adeegyadda mustaqbalka ku haboon ee uu heli doono ilmahu. Haddi loo baahdo xirfad yaqaan kaalmeya lana gor-gortama ayaa dhaqan geli doona.

Haddi la helo dacwad qoraal ah, waa ay noqon karta nidaam dhegeysi oo haboon, ama leh dhawr arrimood taas oo uu noqon karo mid ama in ka badan dhegeysi, bayaankasi waa in laga bixiya dacwadda iyada oo lagu dari doono marka la soo dhameeyo dhegeysiga.

Haddi arrini ku soo baxdo dacwada taas oo hore loo go'aansaday in lagu dhegeysto nidaam haboon oo khusaysa labada dhinac, go'anka dhegeysiga waa lagu xidhaya waana in Gobolku ogeysiya qofka dacwoonaya. Dacwada ay hay'addi ka baraan degi wayday, waxa go'aan ka gadhaya Waaxda.

**Kharshka Qareenka**

Talaabo ama hawl socod kasta oo keenta qabta B ee IDEA, maxakamadda ayaa ku abaal marin doonta kharashk macquul ah qareenka waalidka ama ma'uulka ilmaha haya wax u dhiman yihiin ee dacwada ku gacan sareyey.
IDEA dhigaal-keeda looma istcmaalo in lagu bixiyo kharsh qareen oo la xidhiidha nidaam dhegeysi ama dhamaadka dacwad la oogay, in kasta oo dhigaalkan loo isticmaali karo in lagu qabto nidaamyadan.

Maxakamadda abaal marinta wax macquul u ah ee kharshkii qareenku waa falkan soo socda:
(1) Abaal marintu waa in ay ku saleysnaata qiyaasta gacan sareynta ee bulshadda ay talaabadu ka soo baxday nooca iyo tayadda adeegooda loo qalabeyo. Wax gunno ama laban-laabid ah looma isticmali karo xisaabinta kharashka abaal-marinta.
(2) Kharshka qareenka iyo waxii la xidhiidha lama celin karo adeegyo dhacay ka dib marka la qorey in la siiyo waalidka haddi: siinto waa in ay dhacda wakhtiga ku qoran Nidaamka Qawaaninta Shacbiga ah ee Dawladda Dhexe ama sida nidaamka maamulka, wakhti ka badan 10 casho inta aan la bilaabin sii daynta; siinta lama aqbali karo 10 casho gudahood; iyo haddi uu sarkaalka dhegeysigu arko in

nasashada la helay aanay ku habooneyn waalid in laga badiyo in loo siiyey degananshaha. Si kastaba ha ahaate, haddi waalidku gacan sareyo, laguna qanco diidmada waalidku diiday waxii la siiyey degananshaha, abaal marin ayaa la siin kharshka qareenka iyo waxii la xidhiidhay.

(3) Kharash qareen la siin maayo shirarka IEP iyo waxii la xidhiidha, haddi aanu shirku isu beddelin mid la isugu yeedho nidaam maamul ama talaabo garsoor.

(4) Maxakamadda waa ay naaqusi karta caddadka kharshka qareenka haddi: waalidku si aan macquul ahayn u daba-dheereyo go'aanada u dambeya ee is khilaaf ka; qiimahana si aan macquul ahayn u dhaafiyo sixirka sacadii la bixiyo ee gacan sareynta bulshada loo qabto adeegyo la mid ah oo ay qabtaan qareeno la xirfad , sumcad, iyo khibradba lahi; wakhtiga lagu qaatey, sida loo qalabeyey iyo adeega sharciga oo aan is-lahayn, ama qareenka wakiilka u ahaa waalidka ayaan siin war-bixin fiican dugsiga degmadda markaas ayaa la codsadey nidaam dhegeysi sida uu sharcigu dhigayo.

**Xasuusnow:** Kharashka qareenka lama yareen karo haddi maxakamaddu aragto in gobolka iyo hay'addu si macnadaro ah u dheereyeen gaba-gabadii arrinta, ama lagu xad gudbay Nidaam Ilaalinta.

War-bixinta la xidhiidha nidaam ilaalinta waxa laga soo ururshay qayb ka mid E ee Individual with Disabilities Education Act (IDEA), ee Missouri State Plan for Special Education, degmaddada Compliance Plan ee Special Education, iyo ka qayska Family Educational Rights and Privacy Act ee 1974 (FERPA)

**Missouri Department of Elementary & Secondary Education**
**August 2001**